FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 19-aad. Garowe .19/8/2017. Lam.8.

Faafintabilwalbasoobaxda جريدة الشهرية

*QaybtFaafintaRasmiga ah eeMadaxtooyadaDawladda Puntland*

---

Qiimuhu waaSh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waaSh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisaSh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaanF.Rhalkiisadariyowixii ka yar waaSh.So 3,000, rukunkaiyo qoritaankawaxaa la waydiistaa qeybta maamulkaFaafinta rasmiga ah. Lacagtawaxaalagubixinayaa xafiiskacanshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

TUSMADA

QaybtaKoowaad

Ansixinta Xeerka Ururada/siyaasadeed ee dawladda puntland.

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

*Xeer LR .2. ee 19/8/2017, kuna saabsan ansixinta Xeerka Ururada/ xisbiyada siyaasadeed ee dawladda puntland.*

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Xeerka Lr.2. ee20/8/2017, kuna saabsan ansixintaXeerka Ururada/siyaasadeed ee dawladda puntland.

Madaxweynuhu,

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/84/2017 Garowe,talaada. Date:15/o8/2017;

Markuu tixgeliyey:Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Ururada/xisbiyada siyaasadeed ee dawladda puntland;

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee DawladdaPuntland..

**Prof Cabdiweli maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda puntland.**

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

*Ref:*-XGGW/DPL/ 84 / 2017 Garoowe, Talaada Date:- 15/ 08 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Ururadda/Xisbiyada Siyaasadeed ee Dawladda Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

MARKUU ARKAY: Dastuurka DPL Qodobka 64-aad Faqrada 1-aad.

MARKUU ARKAY: Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref: - **MW/DPS/451/2017 ee July, 31/2017**, kuna saabsan Ansixin Xeer.

MARKUU DHEGEYSTAY: Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Kalfadhigii 39-aad fadhigiisii 22-aad ee 10/08/2017. Xeerka Ururadda/Xisbiyada Siyaasadeed ee Dawladda Puntland.

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Xeerka Ururadda/Xisbiyada Siyaasadeed ee Dawladda Puntland.

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Tell:- +252 90 7799977, Email: hashi7999@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com. www.puntlandparliament.net

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF

SOMALIA

# WAX KA BEDELKA XEERKA URURADDA/XISBIYADDA SIYAASADEED

# EE DAWLADDA PUNTLAND

August. 2017

## Qodobka 1-aad Macnaha Ereyada

1. **Guddi:** Waxa loola jeedaa Guddiga Doorashooyinka Puntland ee ku meel gaarka ah (GDP-KMG) oo u xil saaran diiwaangelinta ururrada siyaasadeed ee daneynaya in ay ka qaybgalaan doorashooyinka degaannada Puntland.
2. **Gobol/Degmo doorasho**: Waxa loola jeedaa gobollada iyo degmooyinka Puntland ee loo asteeyay in doorasho ka hirgasho.
3. **Dawladda:** Waxa loola jeedaa Goleyaasha Dastuuriga ah ee Puntland kuwaasoo kala ah:

   **-Golaha Wakiillada**

   **-Golaha Fulinta**

   **-Golaha Garsoorka**
4. **URUR SIYAASADEED**: Waxa loola jeedaa unug is-abaabul bulsho ee siyaasadeed loona diiwaangeliyey ka qaybgalka doorashada dawladaha hoose inta aan loo aqoonsan xisbi siyaasadeed.
5. **XISBI**: Waxa loola jeedaa urur siyaasadeed oo doorashada deegaan ka dib loo ansixiyey inuu yahay Xisbi qaran oo xaq u leh inuu ka qaybgalo tartanka doorashada guud ee Golaha Wakiillada.
6. **SHISHEEYE**: Waxa loola jeedaa cid kasta ee aan ahayn muwaadin sharci ah ee Puntland, sida ku cad qodobka 5-aad ee Dastuurka Puntland.
7. **WARBAAHINTA**: Waxa loola jeedaa idaacadaha (maqalka keliya leh ama maqal iyo muuqaalba leh), wargeysyada, dokumentariga, goobaha leh minbarro laga hadlo iyo qalab kasta ee loo adeegsado baahinta codka ama warka.
8. **HANTI QARAN:** Waxa loola jeedaa hantida guurtada ah ama tan maguurtada ah oo ay leedahay Dawladda Puntland.
9. **FOOMKA CODSIGA**: Waxa loola jeedaa foom gaar ah ee uu bixiyo Guddiga Doorashooyinka Puntland ee KMG oo lagu buuxiyo warbixinnada iyo caddaymaha laga doonayo ururrada codsaday diiwaangelinta.
10. **DOORASHADA:**Waxaa loola jeedaa tartanka loo galayo doorashada Golaha Wakiilada iyo kuwa deegaanka.

## QODOBKA 2-aad
## Qabashada Codsiyada Diiwaangelinta

1. Guddiga Doorashooyinka ee KMG wuxuu ku baahinayaa warbaahinta dalka bilowga muddada qabashada codsiyada diiwaangelinta ururada siyaasadeed iyo dhammaadka qabashada codsiyada diiwaangelinta iyo cinwaannada lagu soo hagaajinayo ee xarumaha gobollada iyo degmooyinka dalka.

2. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangeliyo urur siyaasadeed waa inuu ku soo qortaa arji foomka loogu tala galay, kuna soo hagaajiyaa Guddiga Doorashada Puntland ee KMG isagoo arjiga ku lifaaqaya caddaymaha iyo qoraalada soo socda:

b. Goortii iyo goobtii ururku ku qabtay shirkii aasaaska ururka ee ugu horreeyey.

t. Liiska magacyada aasaasayaasha urur/xisbi iyo liiska Guddiga fulinta ee ku meel gaarka ah, Golaha dhexe ee urur/xisbi waxaa laga dooranayaa shirweynaha ugu horeeya ee ururka/xisbiga.

j. Qaab-dhismeedka ururka oo ay ku caddahay magaca ururka oo dhan iyo habka uu u qormayo marka la soo gaabiyo, calaamadaha ururka iyo hal-ku-dhegyadiisa.

x. Urur kasta waa inuu Guddiga u keeno 10 nuqul oo daabacan ee xeerarkiisa iyo qoraal cinwaannadiisa Gobollada iyo Degmooyinka dalku ay ku dhan tahay.

kh. Urur kasta waa inuu keenaa caddeyn bixinta khidmad dhan $ 3.500 (Saddex kun iyo Shan oo dollar) oo aan celis lahayn. Lacagta khidmada ah waa dakhli dawladeed, waxaana lagu shubayaa Bangiga dhexe ee Puntland.

d.Xisbi kasta waa inuu keeno caddeyn bixinta khidmad dhan $ 7,500 (Toddoba kun iyo Shan Boqol oo Doolar) oo aan celis lahayn. Lacagta khidmada ah waa dakhli dawladeed, waxaana lagu shubayaa Bangiga Dhexe ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Ururada/Xisbiyada Siyaasadeed ee ku meel gaarka ah

1. Markay dhammaato mudada qabashada araajida diiwaangelinta ururada, Guddigu wuxuu hubiyaa ururada buuxiyey shuruudihii looga baahnaa, waxayna siinayaan ogolaansho ku meel gaar ah oo uu ururkaasi ku hawlgalo.

2. Urur kasta waa inuu ku keenaa mudada Guddiga Doorashooyinka u xaddiday qoraallada iyo caddeymaha soo socda:-

   b. Qabashada shirweynaha ee ururka, meeshii uu ku qabtey, taariikhduu qabsoomay iyo wixii ugu weynaa ee ay qabteen.

   t. Si urur loo sharciyeeyo waa inuu xarumo ku leeyahay ugu yaraan 6-Gobol oo ka mid ah 9-ka Gobol ee Puntland, waana in ay uga diiwaangashan yihiin 300 (Saddex Boqol) oo taageere/cod-bixiye, ururka isu bedela xisbi waa inuu xafiisyo ku yeeshaa dhammaan 9-ka Gobol ee Puntland.

   j. Tirada iyo magacyada gobol/degmo doorasho waxaa lagu qeexi doonaa Xeerka Doorashada Golayaasha Deegaannada Puntland.

3. Ururka/Xisbiga la siiyo ogolaansho ku meel gaar ah oo uu ku hawl-galo, waa inuu Guddigu siiyaa nuqul ka mid ah xeerkan axsaabta si uu hab-dhaqankiisa iyo xeerkiisa ugu saleeyo.

4. Urur/Xisbi kasta oo siyaasadeed waa inay xeerkiisa ku caddahay ku dhaqanka dimoqraadiyada iyo talo-wadaagga, hogaaminta xisbiguna ay ku timaaadaa doorasho xor ah.

5. Urur/xisbi kasta waa in xeerarkiisu waafaqsan yahay Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee Puntland.

6. Urur/xisbi kasta waa inuu xubin ka noqon karo qof kasta oo muwaadin Puntland ah.

7. Xubin ama xubno loo doortay golayaasha sharciga ah, wuxuu luminayaa kursigii loo doortay golayaasha degaanka haddii uu ku biiro xisbi kale.

8. Xisbi kasta oo siyaasadeed waa inuu leeyahay barnaamij cad oo siyaasadeed.

9. Saddexda urur Siyaasadeed ee ugu codadka badan tartanka koowaad ee Golayaasha deegaanka ayaa noqonaya saddexda xisbi ee rasmiga ah.

10. Haddii ay is le'ekaato tirada codadka laba urur siyaasadeed ama in ka badan saamayna ku yeelan karaysa soo-bixidda .xisbiga 3-aad waxaa lagu celinayaa tartanka ururrada sinmay mar kale oo ay cayinto Guddigu.

## Qodobka 4-aad
## Waxyaabaha ka reebban ururada/xisbiyada

1) Waxaa ka reebban urur/xisbi kasta inuu u soo gudbiyo Guddiga warbixin been ah ama khaldan.

2) Ururna/xisbina kama muuqan karto xeerarkiisa qodob ama qodobo ka hor imaanaya Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Puntland.

3) Urur/xisbi kasta waxaa ka reebban inuu dhaqaale ka helo dalal ama ururo dano gaar ah leh oo ka soo horjeeda Diinta iyo Dalka Puntland.

4) Urur/Xisbi kasta waxaa ka reebban inuu hantida qaranka Puntland u adeegsado ama u isticmaalo hawlihiisa u gaarka ah ee doorashooyinka.

5) Urur/Xisbi kasta waxaa ka reebban inuu adeegsado koox ama ciidan hubaysan oo uu ku fushado danihiisa gaarka ah.

6) Urur/Xisbi kasta waxaa ka reebban inuu leeyahay ama ku sifoobo muuqaal Ciidan ama qabiil.

## Qodobka 5aad
## Waxyaabaha lagala nogon karo
## ama uu ku waayi karo aqoonsi urur/xisbi siyaasadeed

Guddiga Doorshadu wuxuu awood u leeyahay inuu kala noqdo aqoonsiga urur/xisbi siyaasadeed markay caddaato waxyaabaha hoos ku qoran:-

1. Inuu jabiyey mid ka ah qodobka afraad.
2. Markay ururka dhexdiisa ka bilaabato khilaaf keeni kara xasillooni daro, xalna loo waayo.

## Qodobka 6aad
## Xuquuqda Ururrada/Xisbiyada Siyaasadeed

Ururada/Xisbiyada siyaasadeed ee la siiyey shahaadada xisbinimo siyaasadeed, waxay xaq u leeyihiin:-

b. Inay si siman u adeegsadaan warbaahinta qaranka, waxayna yeelan karaan warbaahin u gaar ah markay oggolaansho ka helaan hay'adaha ku shaqada leh.

t. Inay si xor ah u gudbiyaan afkaartooda siyaasadeed iyagoon wax u dhimayn xasiloonida iyo nabadgelyada guud ee dalka, isla marakaana waxay mas'uul ka yihiin wixii dhibaato amni daro ah ama dhibaato ah ee ka yimaada taageerayaashooda.

j. Urur/Xisbi wuxuu soo bannaan bixi karaa ka dib markuu la socodsiiyo hay'adaha amniga ee goobaha ay joogaan.

x. In aan la cabudhin karin lana xidhi karin xisbi haddii uusan jebin qodobka 4-aad ee Xeerkan, hanti gaar ahna wuu yeelan karaa.

kh. Urur/Xisbi siyaasadeed dhaliil wuu u soo jeedin karaa ama wuu dhaliili karaa xisbi kale ama xukuumadda .

d. Ururadu/Xisbiyadu wixii dacwad ama cabashooyin ah ee ay ka tawdaan shaqada Guddiga ama hay'adaha dawladda waxay qoraal ahaan ugu gudbinayaan Maxkamadda sare ee Puntland.

## Qodobka 7-aad
## Murashaxiinta u tartameysa doorashooyinka

1. Qof kasta oo muwaadin Puntland ahi wuxuu xaq u leeyahay in la doorto,waxna uu dooran karo, hase yeeshee waxaa murashax noqon kara:

   b. Qof ah muwaadin Puntland, urur/xisbi uu soo sharraxday, buuxiyeyna shuruudaha dastuurka iyo xeerku jeediyey;

   t. Waa inuu yahay Muslim kuna dhaqmo diinta Islaamka.

   j. kana fiyow yahay Maskaxada

x. Waa inaan xukun maxkamadeed oo kama dambeys ahi horey loogu xukumin.

kh.Waa inaan da'diisu ka yareyn 25 sano.

d. Waa inuu ku leeyahay sumcad wanaagsan bulshada dhexdeeda.

2, Hogaanka Ururka/Xisbiga ayaa soo sharaxaya Musharxixiin heer deegaanka ee Ururka/Xisbiga.

## Qodobka 8-aad
## Aqoonsiga Ururada/Xisbiyada Siyaasadeed

1. Guddiga Doorashooyinka ayaa soo saaraya Aqoonsiga Ururada Siyaasaadeed isagoo siinaya Ururadii Buuxshay Shuruudihii diiwaangelinta.

2. Guddiga Doorashooyinka ayaa soo saaraya Aqoonsiga Xisbiyada Siyaasadeed isagoo siinaya Saddex Urur ee u gudbay Xisbi Siyaasadeed.

## Qodobka 9-aad
## Ururada u gudbi waaya Xisbi

Ururada ku guulaysan waaya in ay u gudbaan Xisbi, hase yeeshee Doorashada Golayaasha deegaanka ee Degmooyinka qaarkood ku guulaysta kuraas, waxaa u furan in ay ku biiraan Saddexda xisbi ee la ansixiyey midkood.

## Qodobka 10-aad
## Soo saarista Awaamiir iyo soo jeedinta Xeerar kale

Guddiga Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu curiyo xeerka hab dhaqanka (core of conduct) iyo awaamiir (Directives) aan ka hor-imaanayn xeerkan.

**Qodobka 11-aad**
**Khilaafaadka Ururada/Xisbiyada**

Wixii khilaaf ah ee ka dhex dhasha Ururada/Xisbiyada waxay u soo gudbinayaan Guddiga, haddii ay ku qanci waayaan go'aanka Guddiga, waxaa ay dacwadooda u gudbinayaan Maxkamada saree e Dawladda Puntland.

**Qodobka 12-aad**
**Burin**

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor-imaanya ama la socon Karin Xeerkan

**Qodobka13-aad**
**Dhaqan-galka**

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Golaha Wakiilada Puntland, Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**